Go'aan Lr: 338 /2024.    Date:16th April 2024.

## Go'aan Guddi Fulineed:-

Shir ay isugu yimaadeen Guddida Fulinta Caasimadda Hargeysa maanta oo ay bishu tahay 16 April 2024 shir Gudoomiyena ka ahaa Duqa Caasimadda JSL *(Md,* C/Kariin Axmed Mooge), Kuna saabsanayd Isku Bedel Booyad iyo Dhul, Dood iyo falan qayn dheer ka dib.

### Wuxuu Go'aansaday:-

Markuu Arkay:- Sharciga Wasaaradda Arrimaha gudaha ee Ismaamulka Gobalada iyo Degmooyinka JSL.

Markuu Arkay:- Baahida Ciidanka Dab-Demisku u qabo in lagu qalabeeyo gadiid iyo qalab casriya oo ay ka mid yihiin nooca booyadah biyaha tuura.

Markuu Ogaaday:- Muhiimada ay leedahay in Ciidanka Dab-Demiska laga caawiyo booyada sinotruck 6x4 water sprinkler truck oo wakaalad ah.

Markuu Xaqiiqsaday:- Inay lagama maarmaan tahay in booyadaas loo rabo Ciidanka Dab-Demiska loogu bedelo ganacsataas laba baloog oo dhul ah iyada oo booyada lagu soo qiimeeyey lacag dhan $ 90,000, Halka labada baloog lagu soo qiimeeyey $ 110,000.

Markuu Tixgaliyay:- Tallada masuuliyiinta hawshani khusayso.

### Gudiga Fulintu:-

Ka dib markuu arkay dhamaan asbaabahaasi sare ku xusan Guddida Fulintu wuxuu Go'aansaday in ***Shirkada Al-Khair Motors*** loo sameeyo Dhul-Siin dhan laba baloog 2(90X48M) oo lagaga bedelanaayo booyada sinotruck-ga ah ee loo rabo Ciidanka Dab-Demisaka, Iyaga oo labada Baloog laga siiyey Degmada I/K/Buur gaar ahaan Beerta Ba' Safiya.

Shaqo Wacan

(Axmed Wehelliye Cabdi)
K/S Xoghayaha Fulinta D/Hoose ahna
Agaasimaha Waaxda Maamulka D.H.H.

(C/kariin Axmed Mooge)
Duqa Caasimadda Hargaysa ahna
Gud. Golaha Deegaanka Hargaysa